



UNIVERSITY OF MINNESOTA ROCHESTER

WAXYAABAHA LAGA RABO IN LAGA HUBIYO FOOMKA CODSIGA

Foomku waxaa uu furmayaa Xilliga Xagaaga (fall) ee 1da, Bisha Agosto (August)

❑ Buuxi ama dhameystir foomka codsiga

Foomkaaga codsiga waxaaa ka mid ah, foomka laftiisa iyo dhammaan waxyabaha ku qoran ee lagaa rabo in aad soo dhameystirto, waa muhiim in la buuxiyo foomkan, inta ka horeysa go'aan ka gaarida oo aad ku soo dirtid www.r.umn.edu/apply or www.commonapp.org

❑ QIIMAHA FOOMKA CODSIGA

Foomka laga helo barta internetka qiimihiisu waa \$30 oo aan la soocelin doonin, waxaad ku bixin kartaa Credit card ama Jeega (checks) (credit card or mailed a check). Jeega waxaad ku soo hagaajineysaa Jaamacada Minnesota qaybteeda Rochester (check can be payable to the University of Minnesota Rochester).

❑ Shahaadada Rasmiga ah ee Dugsiga sare (Official high school transcript)

Waxaa lagaa rabaa in aad soo dirtid koobiga rasmiga ah ee shahaadadaada dugsiga sare qaybta ay dhibcahu ka muuqdaan (official high school transcript), kaas oo ay ku jiraan jadwalkii fasalka 12aad. Haddii aad ka soo baddalaneysid kuliyad kale oo aad soo qaadatay 30 iyo wax ka sareeya oo ciridit ah (30 or more college credits) la gaagama baahna in ad soo dirtid shahaadadaada dugsiga sare.

Shahaadada Rasmiga ah ee Kuliyada (Official college transcript)

Haddii aad qaadatay koorsooyin ka diiwaangashan kuliyad kale, (college credit), waa in aad soo dirtaa shahaadada rasmiga ah ee kuliyadaas, oo caddeynaya koorsooyinka aad soo qaadatay iyo mid walba dhibcihii aad ka heshay, kuwaas waxaa kamid noqon kara: koorsooyinka aad qaadatay intii aad ka soo baxday dugsiga sare (courses taken post – secondary enrollment option PSEO) iyo kuwa aad Iskuulka ku qaadatay ee heer kuliyadeed ah ee loo yaqaano (college in the school transcript CIS program).

- Waxaan ka qaadanaa shahaadada rasmiga ha (official transcript) Naviance, Docufide/parchment, scrip-safe National student clearinghouse, ETX (Electronic Transcrip Exchange) iyo waliba (transcript network). Waxaa kale oo kuu banana in ay kuliyaddaii ama Iskuulkaagii uu si toos ah noogu soo diro ama ay boosada u soo dhigaan koobiga shahaadadaad rasmiga ah oo ku jirta baqshad xiran.





UNIVERSITY OF MINNESOTA ROCHESTER

❑ **Warbixinta Rasmiga ah ee natijada imtixaanka**

Noo soodir warbixinta rasmiga ah ee natijada imtixaanka ACT ama SAT. Looma baahna in aad markale soo dirtid natijada imtixaanka haddii aad la soo dirtay shahaadadaada rasmiga ah, ama ay ka muuqato shahaadadaada dugsiga sare. Jaamacada Minnesota Qaybteeda Rocheter koodka ACT (CODE) waa 2154, koodka (code) SAT WAA 5877. Ardeyda ka soo baddalatay kuliadaha kale ee loo yaqaano (transfer applicants), ee kuliyaadoodii ka soo qaatay 30 dhibcoot (credit) iyo wax ka badan loogama baahna in ay keenaan natijada imtixaanka.

❑ **Xiiseynta qoraalka daryeelka caafimaadka waa muhiim**

Ardeyda ku guuleysata ka qaybgalka Xiiseynta UMR ee ku saabsan daryeelka caafimaadka, waxay si kooban u soo sharxayaan sababata ay ku doorteen in ay qaataan xirfada la xiriirta daryeelka caafimaadka. **Qoraalka xiisaynta waxaa looga baahanyahay in aad heshid tixgalinta deeq waxbarasho. Deeqdaasi waxbarasho waxaa loogu talagalay ardeyda ku jirta sannadka kowaad oo kali ah.**

❑ **Macalimka iyo/ama Warqada talo bixinta**

Warqada talabixinta waxaa lagu soo diri karaa boostada caadiga ah ama waxaa lagu soo diri karaa emailka (applyUMR@r.umn.edu). Waxaa kale oo toos noogu soo diri Kara talabixiyaha laftiisa oo kali ah ama liiska foomka ee barta internetka yaa la soo raacin karaa.

Maalinta Kama danbeysta ah:

- maalinta ugu danbeysa codsiga deeqda warbarashada, ardeyda ku jirta sannadka kowaad waa 1da, Disamber
- Maalinta ugu danbeysa codsiga ardeyda ka soo baddalaneysa kuliadaha kale waa 1da Febraayo
- foomka codsiga waxbarashad waa la aqbali doonaa sannadka oo dhan, in meel loo waayo mooye
- Ardeydu waxaa ay haystaan ilaa iyo 1da, Maayo (May), in ay hubiyaan in waxwaliba u dhanyahay iyo inkale.

